



Habeenimadii Tallaaladii Golaha Waxbarashadu waxay gaareen go'aamadani soo socda:

- In todobaad lagu daro simistarkii iskuulka, sidaas darted maalinta ugu dambeysa sanad-dugsiyeed waa maalinta Khamiista, Febraayo 2deeda( halkii markii hore simistarka ku dhammaanayey maalinta Khamiista, bisha Janaayo 26keeda); iyo
- Maalintii qorsheynta macalimiinta waxaa loo bedelay maalinta Jimcaha, Febraayo 3deeda( maalintii hore waxay ahayd ee loo qorsheeyey Jimco, Janaayo 27keeda). Iskuul ma jiri doona Febraayo 3deeda; laakiin iskuul wuxuu jiri doona Janaayo 27keeda.

Wax ka bedelkani la sameeyey wuxuu lagama maarmaan u yahay jadwalada imitixaanada kama dambeysta ee Dugsiyada Sare, iyo sidoo kale waxaa muhiim ah in la joogteeyo iskuulada jadwalkooda.

Ardeydiis isdiiwaanglisay xannaanada caruurta ama barnaamijka SUN Janaayo 27keedii, waxaa la diiwaangaliyey maalinta bisha Febraayo tahay 3da oo ah maalinta qorsheynta macalimiinta loogamana baahna inay dib isku diiwaangaliyaa.

Xiriirkayagii hore ee aan idinla soo sameynay, Golaha Waxbarashadu waxay u codeeyeen in labo maalmood iskuulka lagu daro si loo soo kabo maalmihii iskuulka ee dhammaadka sanad-dugsiyeedka, bedelaada lagu sameeyey maalinta ugu dambeysa iskuulka oo ah Juune 13keeda.

Shaqaalahi Degmadu waxay qiimeynaya wixii suurtagal ah iyaga oo ku saleynaya maalmihii barafka oo dheeraad ah.

Shaqaaluhu waxay si dhow ula soconayaan xaalada iyagoo qoysaska wixii soo kordha la socodsiin doona ee ku saabsan in uu iskuul jiro berito oo Jimco ah, bisha Janaayo tahay 13 iyo in kale.

Waad ku mahadsan tiihin fahamkiina iyo taageerida ay siisaa Dugsiyada Dadweynaha Portland.